

Deeqda Xubin Jidh. Hadiyadda Nolosha.

War ku Saabsan Diiwaanka
Bixiyaha Xubin Jidh ee NHS (NHS
Organ Donor Register).



Bixi hadiyadda nolosha

Talaalada xubno jidh ayaa ka mid ah guulaha mucjisada ah ee daweynta casriga ah. Laakiin waxay gebi-ahaanba ku xidhan yihiin deeqsinimada bixiyeyaasha iyo qoysaskooda raali ka ah inay bixiyaan hadiyaddan nolosha badbaadinaysa.

Hal bixiye ayaa badbaadin kara nolosha dhawr qof isla markaana aragga u soo celin kara laba qof oo kale.

Waxa jirta yaraan daran oo ah xubnaha jidhka isla markaana waxa sii kordhaya faraqa u dhexeeya xubnaha jidhka ee la bixiyo iyo tirada dadka sugaya talaalka xubin jidh. Imminkadan, dad ka badan 10,000 ayaa gudaha Boqortooyada Midowday (UK) u baahan talaal xubin jidh, sannad kastana ilaa 1,000 oo qof ayaa dhinta iyaga oo sugaya talaal xubin jidh.

Baahida loo qabo bixiyeyaal waxay maraysa tiradii ugu badnayd abidkeed. Haddaba maad imminka is qortid deeqda nolosha?

Deeqda nolosha ka tag maanta.

Waa maxay deeq-u-bixin xubin jidh?

Deeq-u-bixinta xubin jidh waa hadiyad ah xubin jidh si qof kale oo u baahan talaal xubin jidh loo gargaaro. Sannad kasta boqolaal qof ayaa waxa noloshooda badbaadiyaa deeqsinimada bixiyeyaasha xubin jidh.

Xubnaha jidhka ee deeq loo bixin karo ka dib geerida waxa ku jira wadnaha, sambabada, kalyaha, beerka, ganaca iyo mindhicirka yar. Xubnaha jidha sida maqaarka, lafta, albaabada wadnaha iyo xuubka hore ee isha ayaa sidoo la isticmaali karaa si loo gargaaro dadka kale.

Dhakhaatiirta iyo kalkaalisoooyinka waxay ku dhaarteen inay qabtaan wax kasta oo suurogal ah oo lagu badbaadinayo nolosha qofka sidaa daraadeena bixinta xubin jidh waxa kaliya ee ay dhacdaa ka dib marka bukaanku dhinto. Badi xubnaha jidh ee la deeqay

waxay ka yimaadaan dadka dhinta iyada oo uu ku xidhan yahay qalabka neefsasha ee jooga gudaha qayb daryeel siyaado ah, ka dib dhaawac maskaxeed oo daran.

Qof uga tag mustaqbal

Si aad go'aan uga gaadhid in aad rabtid ama aanad rabin inaad qof kale siisid nolol ka dib marka aad dhimatid waa wax si gaar ah kuu khuseeya waxana muhiim ah in qof kastaa go'amadiisu gaadho.

Xiitaa haddii aad imminkaba haysatid kaadh deeq-bixiye waa inaad ku biirtid Diiwaanka Bixiyaha Xubin Jidh ee NHS (NHS Organ Donor Register) si loo sugo in rabitaankaaga la diiwaangaliyay. Go'aankaaga kala hadal dadka dad kuu xiga si ay u ogaadaan rabitaankaaga haddii wakhtigaagu soo galo.

Marka aad ku biirtid diiwaanka waxa aad bixinaysaa ogalaansho ah in xubno jidhkaaga ah loo isticmaalo talaal xubin jidh si loo badbaadiyo ama loo fiicneeyo nolosha dadka kale ka dib geeridaada.

Magacaaga oo aad ku dartid diiwaanka waxay qaadan doontaa kaliya dhawr daqiiqadood oo ah noloshaada. Laakiin waxay badbaadin kartaa nolosha qof kale.

Xaqiiqooyinka

Qaraabo badan ayaa sheega inay xoogaa samir ah heleen markii ay ogaadaan in tagistii qofkii ay jeclaayeen ay qof kale siisay fursad ay ku noolaadaan.

Waxay u badan tahay inaad u baahatid talaal xubin jidh halka aad ka noqon lahayd bixiye xubin jidh.

Saaridda xubno waxa lagu dhaqaa isla daryeelka iyo ixtiraamka la siiyo qalitaan kale oo kasta.

Sannad kasta waxa gudaha Boqortooyada Midowday lagu qabtaa tiro ku dhow 3,500 oo ah talaalid xubno jidh isla markaana waxa la qabtaa tiro ka badan 2,500 oo ah talaalid xuub indho oo aragga soo u celiya qof kale.

Tiro ka badan 16 milyan oo qof ayaa gudaha Boqortooyada Midowday wakhtigan isu diiwaangaliyay inay badbaadiyaan nolosha dadka kale iyaga oo ku biiray Diiwaanka Bixiyaha Xubin Jidh ee NHS.

Sida loogu biiro diiwaanka

**Waad ku biiri kartaa diiwaanka
waxana aad na weydiin kartaa
wixii su'aalo aad ka qabtid
bixinta xubin jidh adiga oo
naga soo wacaya:**

**Khadka Bixinta Xubin
Jidh
0300 123 23 23.**

**Shaqaalaha teleefonku waxa
kaliya ee ay awoodaan inay ku
jawaabaan Ingiriisi.**

**Ama waxa aad booqan kartaa
rugtayada internetka oo aad
iska qori kartaa bartan
internetka:**

www.organdonation.nhs.uk

Haddii aad rabtid inaad wax ka
beddeshid ama aad dib uga
noqotid diiwaankaaga ku jira
Diiwaanka Bixiyaha Xubin Jidh
ee NHS, taa waad sameyn
kartaa wakhti kasta adiga oo na
soo wacaya ama adiga oo
isticmaalaya rugtayada
internetka.

